



Sumad: SF/CLC/05/05/PR3

Taariikh: 18/05/05

"WAA DEMBI CAD IN GUDDIYADA NABADGELYADU CID DAMBE AY XUKUN KU RIDAAN, MAXKAMADUHUNA WAA INAY SI DHAKHSO AH ARRINTAN TALLAABO UGA QAADAAN"

Ururka Somaliland Forum oo hore uga hadlay xukunnada qayr-al distooriga ah ee gacanta ugu jira Gudiyadda Nabadgalyada Somaliland, wuxu aad u soo dhawaynayaa hadalkii ka soo yeedhay Gudoomiyaha Maxkamadda Sare, Mudane Faysal Xaaji Jaamac Geeddi ee uu yidhi:

“Anigu xukunka deg-degga ah ma waafaqsani, waayo, nidaamkii Maxkamadaha ayey ka baxsan tahay, waa in ay dembiyadu soo maraan Maxkamadda Degmada iyo ta Gobolka. Guddida Nabadgelyada ee hoos yimaadda Wasaaradda Arrimaha Gudaha anigu runtii ma oggoli, waxaana meeshaa ka soo shaac-baxay qaabkii Siyaad Barre ee xukunka deg-degga ah. Ma rabo in qofna laga qaado xorriyaddiisa, iyada oo aan la soo marin nidaamka sharciga ah oo ay Guddida Nabadgelyadu soo xukunto toban sannadood anigu ma waafaqsani.”

Mudane Faysal markii uu ahaa Gudoomiyaha Guddida Sharciga ee Golaha Wakiiladda sidaas oo kale ayuu uga hadlay Guddiyada Nabadgelyada iyo Xeerkii la yidhi way ku dhisnaayeen oo Gollaha Wakiiladu si caddaan ah oo aan mugdi ku jirin ay u laaleen, ka dib markay arkeen inu yahay Xeer ka soo horjeeda distuurka Somaliland taasina ay ka dhigtay waxba kama jiraan (eeg Go'aanka Golaha ee GW/KF-08/99/99 oo soo baxay 01/08/99).

Waxa kaloo isna dhawaan arrintan ka hadlay Madaxweyne-ku-xigeenka Somaliland, Mudane Axmed Yuusuf Yaasiin, oo si daacad ah u qiray ku xadgudubka xuquuqda muwaadinka, laakiin, isla markaas, arrintan Gudiyadda Nabadgelyada dib ugu riixay Golaha Wakiilada Cusub ee la soo dooran doono September 2005.

Haddii aanu nahay Ururka Somaliland Forum, waxaanu halkan ku caddaynaynaa:

1. In aanu ku raacsanahay Guddoomiyaha Maxkamada Sare, Mudane Faysal Xaaji Jaamac Geeddi, in ku dhaqanka Xeerkan deg dega ah iyo Gudiyadda Nabadgelyada oo bilaa maxkamad dadka xidha-xidhaa ay tahay mid xadgudub ku ah Distuurka Somaliland, qoraallo dhaadheer oo tifatiran oo arrintan ku saabsan ayaanu u gudbinay Dawaladda badhtamihii sannadkii 2004kii iyo ka horba - (eeg nuqulka halkan ku lifaaqan).
2. Sida uu dhigayo Qodobka 128 (2) ee distooriga qaranku, Xeer kasta oo aan waafaqsanayn Distuurku waa waxba kama jiraan.



3. Qof kasta (darajo kasta ha lahaadee) waxa waajib ku ah in uu xaq dhawro Distuurka, gudasho la'aanta waajibkaasina ciqaab ayaa ka dhalan karta (Qodobka 34aad). Gaar ahaan, dhamaan qaybaha Dawladda iyo dawladdaha hoose, heer kasata ha ahaadeene, waxa ku waajib ah in ay ilaaliyaan xuquuqda qofka iyo xorriyaadka aasaasiga ah (Qodobka 21(1)aad ee Distuurka).
4. Mar haddii Xeer-dejintu caddaysay in isticmaalka Guddiyadda Nabadgelyadu ay tahay qayral distuuri, Madaxii Garsoorkuna uu sidaas caddeeyey, waxa qof kasta u muuqata in ku sii dhaqanka Gudiyadan Nabadgelyadu uu yahay wax aan meesha qaban iyo dembi cad oo badheedh ah.

Sidaas awgeed, waxaanu soo jeedineyna, mar labaad, in:

1. Dhamaan Guddiyadda Nabadgelyada loo caddeeyo in wax allaale wixii garsoor ah ama ku saabsan xidhitaan qof ay u daayaan maxkamadaha iyo booliiska iyo hay'adaha sharciga, arrimaha caynkaas ah oo ay faraha la galaanna ay tahay denbi caddaan ah.
2. Dhamaan dadka u xidhan Gudiyada Nabadgelyada waa in si deg deg ah loo sii daayaa, ciddii dhawaan dembi geshay waa in la mariyo eedeyn maxkamadeed oo loo cuskanayo Xeerka Habka Ciqaabta iyo Xeerka Ciqaabta.
3. Aduunka kale dadka xorriyadooda si qayr al distuuri in looga qaado, magdhow ayaa la siiyaa. Anagoo og xaladeena, waxaanu soo jeedineyna in Dawladdu ay ku dhawaaqdo cafis guud isla markaana xorriyadooda u soo celiso dadka ay jeelka u taxaabeen Guddiyada Nabadgelyadu.

Haddii ay Dawladdu talaabooyinkaasi deg-deg ah ugu dhaqaaqi weydo, waxaano soo jeedineyna:

1. In Maxkamadda Sare, iyadoo cuskaneyso Qodobka 66aad (Habeus Corpus) ee Xeerka Habka Ciqaabta ay amar ku soo saarto in la sii daayo qof kasta oo u xidhan xukun ka soo baxay Guddi Nabadgelyo oo aan la soo marin Maxkamad Sharci ah.
2. In Maxkamadaha Gobollada iyo kuwa Degmooyinku, iyaga oo cuskanaya Qodobka 65aad (waaran lagu baadidoono qof si xaq daro ah loo xidhay) ama Qodobka 67aad (Amar in qof Maxkamad la horkeeno) ee Xeerka Habka Ciqaabta, ay amraan in qof kasta oo hadda u xidhan amar ka soo baxay xubin (ama xubno) Gudiyadda Nabadgelyada laga baadidoono xabsiyada lana horkeeno maxkamadda ku haboon si maxkamaddu ay kiiska



iyadu gacanta ku qabato oo Xeerka Ciqaabta iyo Xeerka Habka Ciqaabta mariso qofkaas.

3. In Xeer Ilaalinta iyo Taliska Booliska oo ilaa hadda ka mid ah Guddiyada Nabadgelyadu ay hawsha loo igmaday ka soo baxaan oo qofkii dambi loo heysto ay mariyaan habka Xeerarku dhigayaan, ciddii ku xadgudubta xuquuqda muwaadinkana ay xeerka la beegsadaan. Sida ku cad Qodobka 461aad ee Xeerka Ciqaabta, xildhibaanaka dawladeed ee si sharci darro ah u qabta ama u amra qabashada qof, ama tii oon laamaha sharciga la soo marin mas'uuliyaddiisa loogu xidho qof, waxa uu mutaysanayaa ciqaab xadhig ilaa 3 sanadood ah. Waa inaany jirin cid ka sarreysaa distuurka iyo Xeerarka dalku leeyahay.
4. In dhamaan Hay'adaha ka shaqeeya xuquuqda dadka iyo qareenadu ay arrintan daba galaan oo qof kasta oo u xidhan Guddi Nabadgelyo ay dacwad uga furan maxkamad si qofkaas si deg dega ah loo horkeeno maxmadda ama la sii daayo.

Waxaanu ku adkaynayna Dawladda in wixii fadeexad ah amma xasillooni darro ah ee ka yimaada ku xadgudubka xuquuqul insaaanka aanay mas'uul ka ahayn ciddii ka hadashada ee is-tidhaa wax ka qabta ee ay mas'uul ka yihiin ciddii ku xadgudubtay xuquuqda ama aan wax ka qaban markay arkaan khaladka.

Ugu dambayn, waxaanu ku faraxsannahay in Dawladdu ay soo hordhigi doonta baarlamaanka xeer lagu abuurayo Kommishanka Xuquuqda Insaanka Somaliland, Ururka Somaliland Forum diyaar buu u yahay inuu fikrad iyo gacanba wixii karaankiisa ah uu kaga qaybqaato dadaalka si dalkeenna looga hirgeliyo Kommishan ku dhisan Xeerarka adduunka iyo gaar ahaan mabaadi'da Paris (The Paris Principles).

Wabillahi Tawfiiq

SOMALILAND FORUM

“Ururka Somaliland Forum waa urur madaxbannaan oo ay isku bahaysteen qurb-joog reer Somaliland ahi. Waxa uu ururkani aaminsanyahay qarannimada, horumarka iyo madaxbannaanida Somaliland waxanu iskaashi la sameeyaa jaalliyadaha Somaliland ee dalka dibaddiisa ku dhaqan iyo waliba ciddii kale ee danaysa horumarka Somaliland. Ururkani wuxu rumaysanyahay in dadka reer Somaliland ee dibaduhu ay door ka ciyaari karaan horumarinta dalkooda.”

Wixii faahfaahin dheeraada kala soo xidhiidh urur Guddoomiyaha:

Guddoomiye, Mohamoud Hore (Amoudo), chair@somalilandforum.com

Guddoomiye-xigeenka, Shirtoon Samatar, vice@somalilandforum.com

Xoghayaha, Cabdisalaam Muuse Galaal, secretary@somalilandforum.com

Khasnajiga, Saada Adan, treasurer@somalilandforum.com

Xubin -Guud, Jaamac Cali Muuse xubin@somalilandforum.com

LIFAAQ:



Sumad: SF/CLC/04/06/PR2

Taariikh: 13/07/04

**WAR SAXAAFADEED: “Waa in si dhakhso ah loo loo baabi’yaa Gudiyadda Nabadagalyadda ee Awoodii Maxkamadaha afduubtay”,
Ururka Somaliland Forum oo Qoraal Dheer u gudbiyay Madaxweynaha iyo dawladda Somaliland.**

Dalka oo ay ka jiraan Bilays, Xeer-ilaalin iyo Maxkamado, looma baahna in Guddi, ama xildhibaan dawladeed amma xataa Wasiir uu dadka xabsiyada u dira.

Ururka Somaliland Forum ayaa bishii Juun horaanteedii, qoraal dheer oo ay ku caddeynayaan mawqifkooda ku waajahan guddiyada nabadgelyada u gudbiyey Madaweynaha iyo Dawladda Somaliland. Qoraalkaas waxa uu ururku ku caddeeyeyay in hawlaha garsoorka ee Guddiyada Nabadgelyadu ay dhexgalayaan ay tahay:

- mid ka soo horjeeda Distuurka JSL;
- ku xadgudbaysa sharciyada caalamiga ee xuquuda aadamiga; oo
- si cad u dhaafsan go’aankii 1999kii ay Golaha Wakiiladu ku laaleen ku dhaqanka xeerkaa 1963 ee ay Gudiyaddani saldhiga ka dhigteen amma cuskadaan;
- xukunadooduna ay yihiin qaar ku dhisan dikriitooyinkii nidaamkii kaligii tashiga oo aanu fasaxeynba Xeerkaa 1963kii iyo distuurkii 1961 aad oo markaas Somaaliya ka jiray.

Ururku, waxa uu ku nuuxnuuxsaday in sii shaqaynta Gudiyadani ay tahay mid wax weyn u dhimeysa xorriyadda muwadaniinta iyo sumcada Somaliland, waxay ka codsadeen Madaxweyaha in uu ku dhaqaaqo dhowr talabo oo ay ka mid yihiin:

- in uu soo saaro wareegto Madaxweyne oo uu ku baabi’naayo awoodda Guddiyada Nabadgelyadda, lana sii daayo cid kasta oo hadda u xidhan amar iyaga ka soo baxay
- in cid aan ahayn bileyska, xeer ilaalinta iyo maxkamdaha mooye, cid kale aanay qofna xorriyadiisa ka qaadin;
- in si dhakhso ah loo sameeyo Kommishanka Xuquukda Aadimiga ah ee Somaliland oo ay xubnahooda magacaabaan Golaha Wakiiladdo.

Ururka oo weli ka war sugayaa Dawladda, wuxu go’aansaday inu wada shaqeyn la yeesho ururadda bulshada, hay’adaha xuquuqda aadamaha iyo dhamaan dadweynaha Somaliland ee ka biyo-diiddan hawlaha guddiyadan Nabadgelyadda. Waxaanu garabyada bulshada ku baraarujinya in ay si xishmad leh oo xasilooni ah ugu sheegaan Dawladda iyo xubnaha Baarlamaanka siday lama huraan u tahay in la tirtiro awoodahan Gudiyadda Nabadgelyada.

Ururku, issaga oo wada tashi iyo wada shaqynba la samayn doona hay’adaha bulshada ee gudaaha dalka, wuxu caddaynayaa inu diyaar u yahay ka qaybqaadashada olole ay hay’adahaasi hormood ka yihiin oo dhawaan talaabooyinkooda la soo bandhigidoono.

Ugu dambeyn, wuxu Ururka Somaliland Forum mar labaad usoo jeedinyaa Dawladda Somaliland in ay si deg deg ah wax uga qabato arrintan oo aan ahayn mid siyaasad ku fadhida, ee ah mid xaq iyo sharci ku dhisan, wanaag iyo sharaf ayeyna u noqoneysaa Dawladda, haddii ay si deg deg ah u baabi’so Gudiyaddan oo qof kastoo Somaliland xasuusiya waqtigii madoobaa ee aynu soo dhaafney.

(Talooyinka Ururku ay soo jeediyeen oo waa kuwan hoos ku qoran)

LIFAAQ: Talooyinkii Somaliland Forum so jeediyey – 07/06/2004



Madaxweynaha iyo Xukuumaddiisa

1. Waxa aanu si sharaf leh uga codsanaynaa Madaxwaynaha in uu soo saaro wareegto uu ku baabi'inayo awoodda ay haystaan Guddiyada Nabadgelyada ee dadka ku qabqabanayaan kuna xukumayaan, isla markaana uu ku caddeeyo in qofkii danbi lagu soo oogo loo mari doono si sharci ah (due process of law) oo ah bilayska, xeer-ilaalinta iyo maxkamadaha.

2. Cid kasta oo xilligan u xidhan xukun ay ku qaadeen Guddiyadda Nabadgelyadu, amma in kabadan 48 saac u xidhnaa amar ka soo baxay guddiyadaasi, waa in si dhakhso ah looga sii daayaa xabsiga. Ciddii in ka yar 48 saacadood u xidhan amar ka soo baxay Guddiyadaas waa in isagana si dhakhso ah loo soo taagaa maxkamad sharci ah si waafaqasan Xeerka Habka Ciqaabta ee dalka.

3. Dhammaan xubnaha Guddiyadani waa mas'uuliyiin dawladda xil u haya, waana in la xasuusiyaa in mas'uuliyadoodu tahay ilaalinta xorriyadda asaasiga ah ee qofka, ayna ogaadaan in Qod. 27 (9) ee distoorka iyo Qod.460 iyo 461 ee Xeerka ciqaabtu uu dhigayo in ka xayubinta si sharciga ka baxsan looga xayuubiya xoriyadda shaqsi ay tahay gef lagu mutaysan karo ciqaab.

4. Haddi loo baahanyahay in la soo saaro Xeer Xasiloonnida Guud (Public Order Law), waxa aanu soo jeedinayna in la sameeyo xeer cusub oo casri ah oo isku miisaamaya xuquuqda qofka iyo ta bulshada, waafaqsanna xeerarka caalamiga ah, oo loo gudbiyaa Golayaasha. Inta ka horraysana waa lagu dhaqmi karaa Xeerarka Ciqaabta oo ay ku jiran danbiyada laga galo xasiloonnida guud. (*Waa in aan la mamnuucin banaan baxyada oo dhan – no blanket ban*).

5. Kama soo horjeedno jiritaanka iyo wadashaqaynta maamullayaasha gobollada iyo maamulka guud si ay u wada hantaan hawshooda, marka lagu daro ta nabadgelyada iyo degganaanshaha, laakiin waxa aanu ku adkaysanaynaa in qabqabashada, xidhista loo xidhayo danbiyada qofku uu galaa ay tahay shaqo u gooni ah bilayska, xeer-ilaalinta, iyo maxkamada. Ma jiri karo mas'uul kale, xataa Wasiirada, oo haysan karaa awoodda amar qof lagusoo qabto amase lagu xidho.

6. Waxa aynu u baahannahay in cid kasta oo mas'uul ah uu ku dhaqmo fikrad iyo camal ah dadweynaha ayaad u shaqeysaa, had iyo jeerna ixtiraama xuquuqda insaanka. Waxa annu soo jeedinaynaa in la gaadhay xilligii dawladda iyo Baarlamaanku ay samayn lahaayeen **komishanka Xuquuqda Aadamiga ah ee Somaliland**, taas oo uu magacaabo Golaha Wakiilladu, sannadkiina mar warbixin usoo dirta Golaha, shaqadeeduna noqondoonto ilaalinta iyo dhiirigelinta xuquuqda aadamaha iyo inay gacan ka gaystaan wixii ka baxsan xuquuqda insaanka ee dhaca. Dalal badan oo Africa ah ayaa le Hay'adahan oo kale, tusaale ahaana ta inoogu dhaw waa Uganda. Maalgelinta Hay'addaan siyaabo badan oo degdeg ah ayaa meelo badan looga heli karaa.

Baarlamaanka

7. Shaqaynta ay shaqaynayaan Gudiyada Nabadgelyadu may duudsiyin xuquuqdii qofka oo keliya ee waxay wax u dhimeysaa doodda aynu ku doodno inaynu nahay dal dimuqraadi ah oo daryeela xuquuqda aadamaha. Haddii, sababtu waxay doonto ha ahaatee, aanay dawladdu muddo laba bilood gudaheed (ilaa dhamaadka August 2004) ku soo saarin wareegto ay ku baabi'inayso awoodda xukun ee ay Guddiyadani, waxa annu ka dalbanaynaa labada Gole inay soo saaraan Xeer gaaban oo baabi'inaya guddiyadan.

8. Waxa aanu kaloo ka codsanaynaa Baarlamaanka in ay taageeraan abuuridda iyo shaqadda Komishanka Xuquuqda Aadamiga.

Guddoomiyaha Cusub ee Maxkamadda Sare

9. Waxa aanu aad u jecellnahay inaanu aragno nidaam garsoore iyo sharci oo difaaca xuquuqda iyo xorriyadaha asaasiga ah ee qofka, oo taabagal ku ah sharcinimada qabqabashada iyo xidhidda. Awooda soo saarida amarka sii deynta qofka si xaq daro ah loo heysto (writ of *habeus corpus*) ee ku xusan Qodobka 66aad ee Xeerka Habka Ciqaabta, waa hubka ugu weyn ee lagaga hor iman karo qabashada ama xidhista qofa leyska qabsado si aan sharciga qaabilsaneyn.



10. Inta la helayo wax dhammaan lagaga maarmo sharciyadii hore ee Somalia ee ilaa immika dalkeenna laga isticmaalo, Maxkamadda Sare waa inay u foajignaataa oo ku dhawaaqdaa sharciyada waxba kama jiraanka sida uu dhigayo Qodobka 128 (2) ee Distoorka Somaliland. Garsoorayaasha maxkamada hoose iyo qareennaduba waa inay si cad uga warqabaan wixii sharciyadii hore ah ee waxba kama jiraanka noqonaya.

Shacbiga Somaliland iyo hay'adaha aan Dawliga ahayn

11. Waanu hanwaynahay dadaalka aad ugu jirtaan taabba gelinta nabadda iyo horumarka Somaliland. Taa waxa asaas u ah is-tixgelinta iyo cadaaladda. Waa inaynu wada ilaalinaa sharciaga iyo xasilloonida, isla markaas waa inaynu ilaashanaa qof kasta xorriyadiisa iyo xuquuqdiisa asaasiga. Xorriyaddu waxay inagu jooqtaa dhiig badan, qof walba oo inaga mid ahna waxa ku waajib ah inu kala garto wixii uu xaq u leeyahay iyo wixii waajibaadkiisu yihiin.

SOMALILAND FORUM